

XAYIRAADAH LAMA HURAANKA AH

Tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee lama huraanka ah ayaa ka jira Alberta oo dhan si loo yareeyo faafidda KOOFID-19 loona ilaaliyo nidaamka caafimaadka.

Kulamada

Kulamada gudaha

Kulamada bulshada ee gaarka loo ee gudaha waxay ku kooban yihiin hal qoys oo lagu daray hal qoys oo kale ugu badnaan 10 qof haddii qof walba la tallaaaley. Ma jiraan wax xaddidaad ah oo loogu talagalay carruurta ka yar 12 sano.

Kulamada bulshada ee gudaha waa ka mamnuuc dadka aan la tallaalin.

Kulamada dibadda

Kulamada bulsheed ee gaarka loo leeyahay waxay ku kooban yihiin ugu badnaan 20 oo qof, iyadoo 2 mitir ay mar walba foqeeyaan jirka.

Aroosyada iyo aaska

Xafladaha aroska gudaha iyo adeegyada aaska waxaa loo oggol yahay ilaa 50 qof ama 50% ee xeerka dabka, hadba kii yar.

Soo dhaweynta aroska iyo asska gudaha lama ogola, haddii xarunta martigalinta ay fuliso Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddididda (Restrictions Exemption Program).

Xafladaha dibadda, adeegyada iyo soo dhaweynta waxaa loo oggol yahay ilaa 200 oo qof. Iibinta khamriga waa inay dhammaataa 10ka fiidnimo iyo isticmaalka 11 ka fiidnimo haddii xarunta martigalinta ay fuliso Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadda (Restrictions Exemption Program).

Goobaha cibaadada

Dhammaan goobaha cibaadada waxay ku xaddidan yihiin 1/3 ee xeerka dabka ee ka qaybgalka gudaha ee qof ahaaneed. Xirashada afxirka waa lama huraan. Dadka ka yimid hal guri waa inay 2 mitir u jiraan qoysaska kale mar walba.

Afxirka iyo kala fogaanshaha jirka

Afxirka iyo kala fogeynta jirka waa lama huraan dhammaan goobaha dadweynaha ee gudaha, goobaha shaqada, iyo goobaha cibaadada.

Shaqaalaha waa inay xirtaan afxir dhammaan goobaha shaqada ee gudaha, marka laga reebo markay keligood joogaan saldhigyada shaqada.

Ka shaqaynta guriga

Ka shaqaynta guriga waa lama huraan haddii loo shaqeeyaha go'aamiyay joogitaan qofka si shaqada u noqoto mid wax ku ool ah.

Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadda

Ganacsatada waa inay hirgeliyaan Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadda ee u baahan dadka 12 jir iyo wixii ka weyn inay keenaan caddaynta tallaalka ama natiijada baaritaanka degdegga ee ah ineysan qabin, ama raacaan mugga iyo xaddidaadda hawlgalka. Afxirka ayaa weli loo baahan yahay. Ganacsatada uma baahna inay codsadaan barnaamijka.

Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidaadda aan khuseeyn:

- meheradaha u baahan in loo helo nolol maalmeedka
- shaqaalaha meheradaha ka qaybgalaya barnaamijka
- carruurta ka yar 12

Xayiraadaha ganacsiyada

Dukaamada Tafaariiqda gudaha, majaajilada iyo goobaha madadaalada

Xarun kasta oo gudaha ah oo aan fulin Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddididda waa inay xaddido muugga 1/3 ee xeerka dabka oo u baahan ka qaybgalayaasha inay la joogaan xubnaha qoyska oo keliya, ama 2 xiriir u dhow haddii ay keligood nool yihiin.

XAYIRAADAH LAMA HURAANKA AH

Tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha ee lama huraanka ah ayaa ka jira Alberta oo dhan si loo yareeyo faafidda KOOFID-19 loona ilaaliyo nidaamka caafimaadka.

Dhacdooyinka iyo goobaha dibedda

Dhacdooyinka iyo goobaha bannaanka ma laha xaddidaad mug (marka laga reebo musqulaha), laakiin waa inay joogteeyaan 2 mitir inta u dhaxaysa qoysaska ama 2 xiriir oo u dhow kuwa keligood nool.

Makhaayadaha, kafateeriyada, baararka, iyo meelaha lagu caweeyo

Xayiraadaha soo socda ayaa khuseeya meheradaha aan hirgelin Barnaamijka Ka Dhaafadda Xaddidaadda.

- Ku cunt gudaha lama oggola.
- Ku cunteynta dibadda ah waxaa la ogol yahay ugu badnaan 6 qof miiskiiba (hal guri ama 2 xiriir oo u dhow kuwa keligood nool)
- libinta khamriga iyo xaddidaadda isticmaalka ayaa khuseeya (iibka wuxuu dhammaadaa 10ka fiidnimo, isticmaalka illaa 11ka fiidnimo).

Ciyaaraha, jirdhiska, madadaalada iyo howalaha firfircoonida

Qaangaarka (ka weyn 18 sano)

Xayiraadaha soo socda ayaa khuseeya goobaha ama barnaamijyada aan hirgelin Barnaamijka Ka Dhaafidda Xaddidyada:

- Fasallada kooxda gudaha iyo waxqabadyada lama oggola.
- Tartamada gudaha lama oggola marka laga reebo meesha Ka Dhaafidda tallaaalka.
- Tababbarka gudaha ah qof ka qof ah iyo howlaha qofka kaligiis ah ayaa la oggol yahay oo leh kala fogaansho jireed oo 3 mitir ah.

Waxqabadyada bannaanka ayaa sii socon kara iyadoon wax xannibaad ah lahayn.

Dhalinyarada (ka yar 18)

Fasallada kooxda gudaha, tababarka, iyo tartamada waa la oggol yahay, laakiin ka qaybgalayaasha waa inay:

- iska baaro astaamaha
- joogteeyo kala fogaanshaha 2 mitir, marka laga reebo dhallinta inta ay ku jiraan dhaqdhaqaaqa jirka
- xidho afxir, marka laga reebo dhallinta inta aad ku jirto dhaqdhaqaaq jireed

Imaanshaha daawadayaasha waxaa lagu xaddiday awoodda 1/3 ee awoodda xeerka dabka.

Ka qaybgalayaashu waxay ku kooban yihiin hal qoys ama 2 qof oo xiriir u dhow ah haddii ay keligood nool yihiin waana in la xirto afka oo la joogteeyo kala fogaanshaha 2da mitir ee jirka.

Waxqabadyada bannaanka ayaa sii socon kara iyadoon wax xannibaad ah lahayn.

Xerooyinka maalinlaha iyo habeenlaha

Xerooyinka maalinlaha waa in ay joogteeyaan kala fogaanshaha 2da mitir ee jirka qaybgalayaasha iyo afxirashada.

Xerooyinka habeenkii waa inay raacaan tusaalayaalayaasha kooxaha.